



# Annual Conference Concept Note

## 1. HORDHAC

Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (WCAD) ayaa qaban-qaabinaysa Shir-sannadlihii ugu horreeyay ee Bahda Cadaaladda 2025. Shirkan ayaa qayb ka ah dardar galinta Istaraatiijiyadda Bahda Cadaaladda (2025-2029), wuxuuna isu keeni doonaa daneeyayaasha muhiimka ah sida hay'adaha xukuumadda, kuwa garsoorka, Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka, hay'adaha horumarinta, bulshada rayidka ah, iyo khabarada caalamiga ah.

Madashan sannadlaha ah ayaa sannadkan diiradda lagu saari doonaa isku-xirka hay'adaha bahda cadaaladda, dib-u-habeyn sharci, ballaarinta helitaanka caddaaladda, xallinta caqabadaha dhaqaale, xoojinta madaxbannaanida garsoorka, kor u qaadista isla xisaabtan-ka, iyo dib u dhiska kalsoonida shacabka ee hay'adaha garsoorka Soomaaliya.

## 2. XAALADDA GUUD

Bahda Cadaaladda Soomaaliya ayaa maraysa marxalad xasaasi ah. Inkasta oo horumar la sameeyay, haddana waxaa jira caqabado waaweyn oo dhanka hannaanka maamul, hanaanka sharci, iyo hababka hawlgalined: xeerar duugoobay, helitaanka adeegga cadaaladda oo xaddidan, awoodda maamul oo liidata, dhaqaale yari joogto ah, iyo kalsoonida dadweyne oo hooseysa.

Waxaa si degdeg ah loogu baahan yahay dardargalinta dib-u-habeyn ballaaran si loo xoojiyo heshiiska bulsho (social contract) ee Soomaaliya.

## 3. UJEEDDOOYINKA SHIRKA

Shirka ayaa leh ujeeddooyin muhiim ah oo ay ka mid yihiin:

- In la qiimeeyo mudnaanta dib-u-habeynta hay'adaha iyo shuruucda.
- In la dhiirrigeliyo dood ku saabsan sidii loo hagaajin lahaa isku xirnaanta hay'adaha bahda cadaaladda.
- In la aqoonsado baahida dhaqaale iyo hababka lagu buuxin karo.

- In la xoojiyo madaxbannaanida, daahfurnaanta, iyo isla xisaabtanka garsoorka.
- In la kordhiyo kalsoonida bulshada iyo ka-qaybgalka muwaadiniinta.
- In la dhiso qaab dabagal iyo cabbir lagu qiimeeyo natiijooyinka dib-u-habeynta.

#### 4. NATIJOOYINKA LA FILAYO

Shirka waxaa laga filayaa inuu keeno:

- Talooyin siyaasadeed oo mudnaan leh oo ku saabsan dib-u-habeynta bahda cadaaladda.
- Ansixinta rasmiga ah ee hannaanka fulineed ee Hirgelinta Istiraatiijiyadda Bahda Cadaaladda.
- Meelmarinta Qorshaha Dhaqaale u raadinta Horumarinta Bahda Cadaaladda.
- Dardargelinta taageerada siyaasadeed ee madaxbannaanida garsoorka.
- Kororka wacyi iyo kalsoonida bulshada ee hay'adaha caddaaladda.

#### 6. MARTIDA IYO DOODAHA SHIRKA

Shirka waxaa lagu martiqaadayaa khibaro heer sare ah oo isku dheellitiran khibrad maxalli ah iyo mid caalami ah. Waxaa xoogga la saarayaa kala isu dheellitirnaanta jinsiga, mataaladda heerarka kala duwan ee dawladda, iyo takhasusyada kala duwan si loo hubiyo in dooddu noqoto mid mira dhal ah oo ballaadhan.

#### 7. GUNAANAD

Shirkii ugu horreeyay ee Bahda Caddaaladda Soomaaliya 2025 wuxuu noqonayaa bar-billaw taariikhi ah oo mideynaya dhammaan daneeyayaasha garsoorka iyo cadaaladda.

Isu keenidda khibrado kala duwan iyo aragtiyo badan oo mira-dhal ah ayaa dardar gelin doonta geeddi-socodka dib-u-habeynta cadaaladda iyo isla xisaabtanka garsoorka.



info@moj.gov.so  
www.moj.gov.so



@MojSomalia